

Cunugaagu ma waxa noqonaya

5 jir → **AGOOSTO**  
**31** ?



Haddii ay sidaas tahay, **hada waa waqtigii aad ka** diiwaangelin lahayd kindergartenka!

**Hel caawinaada**   
isdiwaangelinta. Soo booqo xafiiska iskuulka ama degmada deriskaaga.

## Diiwaangelinta Dugsiga Barbaarinta Xaashida Warbixin Macluumaad

Dhammaan degmooyinka Qariirada Waddooyinka waxaa la isticmaala dokumeentigaan soo socda muddada howsha diiwaangelinta. Haddii ay macquul tahay, horay u soo qaado si ay kaaga caawiyaan in ay ku sahlanaato diiwaangelinta cunugaaga. Haddii aad qabto wax su'aala oo ku saabsan dokumeentigaas, degmo dugsiyeedkaaga ayaa ka caawin kara.

- **Caddeynta Dhalashada\***
- **Rekoorka Tallaalada** (busbus, qaamo-shiirta, hablo-baas, jadeeco, dabayl, qiix-dheerta, teetano, cagaarshow b, qufaxa kixda)
- **Caddeynta Cinwaanka** (heshiiska ijaarka ama iibsashada, waraaqaha hayadaha bulshada, biilasha tamarta)
- **Macluumaadka Laxiriiridda Degdegga ah**

Degmooyinka qaarkood, macluumaad dheeraada ayaa loo baahan yahay:


*\* Kent iyo Seattle looma baahna shahaadada dhalashada, laakiin wixii waraaqo sharciya oo ay ku qoran yihiin ardayga magaciisa iyo taariikhdiisa dhalashada, sida baasaboorka, waraaqaha maxkamadda, kaarka aqoonsiga Gobolka Washington, waraaqaha korinta, iwm. Dokumeentigi waa inuu caddeeya aqoonsiga iyo da'da.*

Seattle	Tukwila
<ul style="list-style-type: none"><li>• Macluumaadka Laxiriiridda Degdegga ah ee labo (2) ruux</li><li>• Labo (2) dokumeenti kala-duwan oo muujnaya caddeynta cinwaanka oo ah 8 dii toddobaad ee ugu danbeeyay</li></ul>	<ul style="list-style-type: none"><li>• Aqoonsi Sawir leh ee Waalidka</li></ul>

Soo wac Qadka Caafimaadka Qoyska

**1-800-322-2588**

si aad u hesho caawinaada ah helitaanka degmo dugsiyeedka cunugaaga.



**RACE to the TOP**